Helsinki



# Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee adeegyada magaalada Helsinki 2026–2029

Magaalada Helsinki waxay samaysay qorshe lagu hubinayo in adeegyada magaaladu ku habboon yihiin qof kasta, isla markaana macaamiisha oo dhan loola dhaqmo si isku mid ah oo wanaagsan. Qorshahan waxaa la yiraahdaa Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee adeegyada magaalada Helsinki 2026–2029.

Akhri sababta iyo habka qorshahan loo sameeyay, waxa uu qorshuhu ka kooban yahay, iyo sida aad adiguba ula socon karto arrimaha Helsinki isla markaana aad saameyn ugu yeelan karto.



# Liiska waxyaabaha ku jira

Helsinki waxaa ku nool dad badan oo kala duwan ....................................... 4

Magaaladu waa inay horumarisaa sinnaanta iyo caddaaladda ....................... 5

Magaalada Helsinki waxay baartay sida adeegyada loo horumarin lahaa ....................................... 6

Arrimaha mudnaanta gaarka ah leh ee qorshaha iyo waxqabadyada ugu muhiimsan ....................................... 7

Helsinki waxay horumarisaa caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada ....................................... 9

Kor ayaa loo qaadaa aqoonta iyo fahamka shaqaalaha magaalada ee ku saabsan kala-duwanaanshaha dadka ....................................... 10

Adeegyada Helsinki waxaa loo horumarinayaa si ay ugu habboonaadaan macaamiisha kala duwan oo dhan ....................................... 11

Waxaa la yareynayaa takoorka, cunsuriyadda iyo dhibaataynta ................... 14

Sidee loola soconayaa inay arrimuhu is beddalayaan? ................................ 15

Halkeed ka helaysaa xog dheeraad ah? ....................................... 16

Sideen anigu saameyn u yeelan karaa? ....................................... 16

# Helsinki waxaa ku nool dad badan oo kala duwan

**Helsinki waxaa ku nool dad badan oo qiyaastii 700 000 oo qof ah waana inay magaaladu iyaga ku wada habboonaato.**

Helsinki waxaa ku nool dad aad u kala duwan. Waxaa jira carruur, dhalinyaro, dad waaweyn iyo waayeel. Qaar waxay ku dhasheen Helsinki, balse dad badan ayaa asal ahaan ka soo jeeda meelo kale oo Finland ah ama dalal kale.

Dadka deggan magaalada waxay leeyihiin astaamo iyo xaalado nololeed oo kala duwan. Waxay leeyihiin jihooyin jinsi oo kala duwan, waxayna ka tirsan yihiin jinsiyo kala duwan. Waxay ku hadlaan luqado kala duwan, waxayna haystaan diimo kala duwan. Dad badan ayaa naafo ah ama qaba xanuunno kala duwan.

Sinnaanta iyo caddaaladdu waxay ka dhigan yihiin in dadka nooc kasta leh lagu soo dhoweynayo Helsinki, isla markaana dadku ay isku qiimo leeyihiin. Adeegyada magaaladu waa inay ku habboonaadaan dadka oo dhan. Adeegyadaas waxaa ka mid ah adeegyada caafimaadka iyo daaweynta cudurrada, dugsiyada iyo adeegyada qoysaska, maktabadaha iyo gaadiidka dadweynaha, iyo sidoo kale habka magaalada loo qorsheeyo loona dhiso.

Marka magaalada loo qorsheeyo si adeegyadeedu ugu habboonaadaan qof kasta, dadka deggan magaalada waxay dareemaan inay qayb ka yihiin magaalada. Helsinki waxay rabtaa inay noqoto magaalo sidan oo kale ah. Go'aan-qaateyaasha iyo shaqaalaha magaalada Helsinki waa inay hubiyaan in dhammaan dadka deggan magaalada si isku mid ah oo wanaagsan loola dhaqmo marka ay adeegyada magaalada isticmaalayaan. Sidaas darteed ayay Helsinki u samaysay qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda. Qorshuhu wuxuu shaqaynayaa inta u dhaxeysa sannadada 2026–2029.

# Magaaladu waa inay horumarisaa sinnaanta iyo caddaaladda

**Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladdu wuxuu ku salaysan yahay sharciga Finland, iyo sidoo kale istaraatiijiyadda iyo qiyamka magaalada Helsinki.**

Sharciga Finland wuxuu dhigayaa inaan qofna la takoori karin. Dadka looma takoori karo, tusaale ahaan, da'dooda, jinsigooda, luqaddooda, asalkooda, jihadooda jinsi ama naafonimadooda awgeed. Sharcigu wuxuu sidoo kale waajib ka dhigayaa inay magaalada Helsinki ka hortagto takoorka, isla markaana ay horumariso in dadka oo dhan si isku mid ah oo wanaagsan loola dhaqmo.

Magaalada Helsinki waxaay rabtaa inay hubiso in qof kasta uu Helsinki ku noolaan karo nolol wanaagsan oo ammaan ah. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu ahaado sida uu isagu yahay. Arrimahan waxay ku qoran yihiin istaraatiijiyadda magaalada. Istaraatiijiyaddu waa dukumenti muhiim ah oo hagaya hawlaha iyo go'aannada magaalada. Waxaa lagu sheegayaa qiyamka iyo mabaadi'da Helsinki. Kuwaas waxaa ka mid ah sinnaanta, caddaaladda iyo horumarinta xuquuqda aadamaha. Ficil ahaan arrintan macnaheedu muxuu yahay? Dhammaan shaqaalaha Magaalada Helsinki waa inay tixgeliyaan in dadka Helsinki ku nool ay kala duwan yihiin, isla markaana ay leeyihiin baahiyo kala duwan. Shaqaaluhu waa inay qof kasta ula dhaqmaan si wanaagsan oo xushmad leh. Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in si wanaagsan loola dhaqmo marka uu adeegyada magaalada isticmaalayo. Ma bannaana in qofna loola dhaqmo si ka liidata dadka kale. Qof kastaa waa inuu heli karaa adeegyada magaalada. Tusaale ahaan, isticmaalka kursiga curyaamiinta waa inuusan caqabad ku noqon helitaanka adeegyada.

# Magaalada Helsinki waxay baartay sida adeegyada loo horumarin lahaa

**Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladdu wuxuu ku salaysan yahay daraasado, baaritaanno, wareysiyo iyo ra'yiga dadka deggan magaalada.**

Sannadihii 2024 iyo 2025 ayaay magaalada Helsinki baartay sida adeegyada loo horumarin lahaa si loo hubiyo in macaamiisha oo dhan ay helaan sinaan iyo caddaalad. Arrintan waxaa wax laga weydiiyay, tusaale ahaan, dadka deggan magaalada, shaqaalaha magaalada iyo ururo kala duwan. Sidaas ayaa lagu helay xog muhiim ah oo loogu baahnaa diyaarinta qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda. Dadkii diyaariyay qorshaha waxay sidoo kale wax ka akhriyeen daraasado iyo baaritaanno kala duwan, iyo ra'yi-celinta ay magaaladu ka heshay hawlaheeda. Qorshaha waxaa lagu qeexay arrimaha mudnaanta gaarka ah leh. Arrinta mudnaanta gaarka ah leh waa arrin ay magaaladu si gaar ah diiradda u saarayso.



# Arrimaha mudnaanta gaarka ah leh ee qorshaha iyo waxqabadyada ugu muhiimsan

**Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee Helsinki wuxuu leeyahay afar arrimood oo mudnaan gaar ah leh, kuwaas oo khuseeya magaalada oo dhan.**

**Magaalada Helsinki waa inay**

- **hirgelisaa hababka hoggaaminta iyo shaqada ee sida ugu fiican u horumariya caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada ee adeegyada magaalada**
- **kor u qaaddaa aqoonta iyo fahamka shaqaalaha magaalada ee ku saabsan kala-duwanaanshaha dadka**
- **horumarisaa adeegyada magaalada si ay uga caddaalad badnaadaan sida ay hadda yihiin**
- **yaraysaa takoorka, cunsuriyadda iyo dhibaataynta**

Arrimahani waxay khuseeyaan dhammaan waaxyaha magaalada Helsinki iyo hay'adaha ganacsi ee magaaladu leedahay. Waaxyaha Magaalada Helsinki waa: waaxda barbaarinta iyo waxbarashada, waaxda deegaanka magaalada, waaxda adeegyada bulshada, caafimaadka iyo badbaadinta, iyo waaxda dhaqanka iyo wakhtiga firaaqada. Hay'adaha ganacsi ee magaaladu leedahay waxaa ka mid ah, tusaale ahaan, adeegyada shaqo raadinta iyo Palvelukeskus Helsinki. Palvelukeskus Helsinki waxay bixisaa, tusaale ahaan, adeegyada nadiifinta, cuntada iyo daryeelka nolol-wanaagga. Helsinki waxay sidoo kale leedahay xafiiska maamulka magaalada. Waa xafiis diyaariya, tusaale ahaan, go'aanno iyo qorshayaal kala duwan. Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladdu wuxuu sidoo kale khuseeyaa xafiiskan xattaa.

Magaalada Helsinki waa hay'ad weyn oo leh hawlo kala duwan iyo adeegyo badan oo noocyo kala duwan ah. Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladdu wuxuu sheegayaa himilooyinka magaalada oo dhan ee ku saabsan sida loo horumarinayo caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada. Qorshuhu wuxuu sidoo kale sheegayaa tallaabooyinka ugu muhiimsan ee lagu gaari karo himilooyinkaas. Waax kasta iyo adeeg kasta waa inay si faahfaahsan u qeexaan sida himilooyinka iyo tallaabooyinka qorshuhu ay ficil ahaan u saameynayaan hawlahooda. Akhri faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha mudnaanta leh ee qorshaha iyo sida loo fulinayo. Arrimaha mudnaanta leh looma kala hormarin muhiimad ahaan, balse dhammaantood isku si ayay muhiim u yihiin.



# Helsinki waxay horumarisaa caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada

Haay'ad kasta oo ka tirsan magaalada Helsinki waa inay horumarisaa hababka shaqada ee kordhiya caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada. Haay'adaha magaalada waxaa loola jeedaa waaxyaha kala duwan, hay'adaha ganacsi ee magaaladu leedahay iyo xafiiska maamulka magaalada. Haay'ad kastaa waa inay leedahay qaab hawleed u gaar ah, taas oo ah xeerar iyo qorshayaal cad oo arrintan khuseeya.

Shaqaale kastaa wuxuu shaqadiisa ku matalaa magaalada. Sidaas darteed shaqaaluhu waa inay ogaadaan habka ugu wanaagsan ee loola shaqeeyo dadka kala duwan. Hoggaamiyeyaashu waa inay tusaale u noqdaan sida dadka oo dhan loola dhaqmo si siman oo xushmad leh.

Haay'adaha magaaladu waa inay sidoo kale mar walba hore u sii qiimeeyaan saamaynta ay go'aannadoodu ku yeelan karaan nolosha dadka kala duwan.



# Kor ayaa loo qaadaa aqoonta iyo fahamka shaqaalaha magaalada ee ku saabsan kala-duwanaanshaha dadka

Aqoontu waxay horumarinaysaa ka hortagga takoorka iyo bixinta adeegyada dadka oo dhan loogula dhaqmayo si caddaalad leh.

Shaqaalaha magaalada Helsinki waa inay fahmaan arrimahan:

- dadka kala duwan ee magaalada ku nool
- waxa ay tahay caddaaladda dadka iyo sida loo horumarin karo
- sida loo horumarin karo sinnaanta jinsiyada
- waxa ay yihiin xuquuqda aadanuhu, iyo sida loo hubin karo inay hirgalaan.

Shaqaaluhu waa inay helaan aqoon iyo tababar dheeraad ah oo ku saabsan arrimahan. Tababarku wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay dadka ka shaqeeya adeegga macaamiisha, taas oo ah inay shaqadooda kula kulmaan dad kala duwan.

Aqoonta iyo tababarku waa inay sidoo kale ka warramaan dadka xaaladdooda sinnaan ah aanan ahysan ee aanan si fudud uga muuqan tirakoobyada ama daraasadaha. Inta badan waxaa laga hadlayaa kooxo ay dadkoodu yar yihiin. Tusaale ahaan, sahannada waxaa inta badan ka jawaaba tiro yar oo dad naafo ah ama dad jinsigoodu aanu ahayn lab ama dhedig, balse uu yahay jinsi kale. Marka koox noocaas ah ay tiro yar ku yihiin dadka sahanka ka jawaabaya, caadi ahaan lama samayn karo tirakoob ku saabsan iyaga iyo jawaabahooda. Sidaas darteed, waxaa jirta halis ah in ra'yigoodu aanu soo bixin, isla markaana aanay sidaas awgeed arrimaha u saameyn karin si la mid ah dadka, tiradoodu badan tahay. Dadka oo dhan ayaa xaq u leh in la dhageysto.

# Adeegyada Helsinki waxaa loo horumarinayaa si ay ugu habboonaadaan macaamiisha kala duwan oo dhan.

Dadka kala duwan waxay leeyihiin baahiyo kala duwan, Helsinkina waa inay awood u leedahay inay si isku mid ah oo wanaagsan ugu adeegto macaamiisha kala duwan oo dhan.

Adeegyada magaalada waa in si gaar ah loogu fiirsadaa macaamiisha halis ugu jira takoor ku salaysan sababo badan ama ku jira xaalad aad u nugul.

Takoorka ku salaysan sababo badan wuxuu ka dhigan yahay in qof si xun loola dhaqmo sababo kala duwan awgood, tusaale ahaan da'diisa, asalkiisa ama naafonimadiisa awgeed. Qofku wuxuu ku jiri karaa xaalad nugul, tusaale ahaan naafonimadiisaama xaaladdiisa awgeed. Tusaale ahaan, qofka naafada ah waxaa ku adkaan karta inuu helo xog ku saabsan adeegyada iyo inuu difaaco xuquuqdiisa. Magangelyo-doonku wuxuu ku jiri karaa xaalad nugul, marka uu joogo Finland, balse aanu aqoon shuruucda iyo xeerarka Finland, isla markaana aanu ku hadli karin af Finnish.

Qofka naafada ah wuxuu xaq u leeyahay in adeegyada Helsinki loogu sameeyo habaynno macquul ah, haddii uu u baahan yahay. Habayn macquul ah waxay tusaale ahaan noqon kartaa, in qofka naafada ah loo diyaariyo goob aan caqabado lahayn. Waxay sidoo kale noqon kartaa in qofku xaq u leeyahay inuu isticmaalo turjubaan, haddii uu turjubaan u baahan yahay naafonimadiisa awgeed.

Magaaladu waxay sidoo kale ku fududeyn kartaa dadka kala duwan inay helaan adeegyada iyadoo adeegsanaysa ula dhaqan gaar ah oo bositif ah ama togan. Ula dhaqanka gaarka ah ee togan wuxuu ka dhigan yahay in qof ama koox dad ah loola dhaqmo si ka duwan dadka kale, maadaama ay faa'ido leedahay. Tusaale ahaan ula dhaqanka gaarka ah ee togan waa, in gabdhaha iyo haweenka leh asal soo-galooti ay ku leeyihiin wakhtiyo dabaal oo u gaar ah barkadaha dabaasha ee Helsinki.

Adeegyada Helsinki waxay noqonayaan kuwo caddaalad badan, marka dadka Helsinki ku nool ee kala duwan ay awoodaan inay saameyn ku yeeshaan, sida magaalada iyo adeegyadeeda loo horumariyo. Dadka Helsinki ku nool waxay tusaale ahaan ka jawaabi karaan sahannada magaalada ama ka qayb qaadan karaan hawlaha magaalada. Xog dheeraad ah oo ku saabsan ka-qaybgalka waxay ku taallaa dhammaadka qoraalkan. Hadafka Helsinki waa, in dadka deggan magaalada ee kala duwan ay ka qayb qaataan horumarinta magaalada.

Marka adeegyada la horumarinayo, waxaa sidoo kale la tixgelinayaa caddaaladda adeegyada dijitaalka ah. Adeegyada dijitaalka ahi dad badan ayaay u fududeeyaan arrimahooda. Hase yeeshee, dadka qaarkood waxaa ku adag inay internetka galaan ama isticmaalaan taleefanka casriga ah, tablet-ka ama kombiyuutarka iyo adeegyada elektaroonigga ah ee kala duwan. Waa muhiim in magaaladu hubiso in adeegyada loo heli karo siyaabo kala duwan isla markaana macmiilku uu dooran karo habka isaga ku habboon.

Tusaale ahaan, qofku wuxuu wici karaa taleefan ama wuxuu tagi karaa xarun adeeg oo magaaladu leedahay, haddii uu doonayo inuu arrin qabto. Xogta ku saabsan helitaanka aan caqabadaha lahayn ee xarumaha magaalada Helsinki waxaa laga heli karaa internetka, bogga internetka ee Palvelukartta. Helitaanka aan caqabadaha lahayn wuxuu ka dhigan yahay in goobtu ku habboon tahay qof kasta. Tusaale ahaan, dadka isticmaala kursiga curyaamiinta ayaa la tixgeliyaa. Sida ku xusan qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda, xogta ku saabsan helitaanka aan caqabadaha lahayn ee dhammaan xarumaha Magaalada Helsinki ayaa lagu cusboonaysiinayaa adeegga internetka.



# Waxaa la yareynayaa takoorka, cunsuriyadda iyo dhibaataynta.

Magaalada Helsinki waxay hore u lahaydba habab shaqo oo lagu ogaan karo laguna yareyn karo takoorka, cunsuriyadda, dhibaataynta galmada iyo dhibaataynta kale. Hadda hababkan ayaa dib loo eegi doonaa, waxaana la qiimeyn doonaa inay wanaagsan yihiin iyo in kale. Marka loo baahdo, habab shaqo oo cusub ayaa la samayn doonaa.

Waxa kale oo muhiim ah in la horumariyo hababka, lagu ogaan karo laguna joojin karo dhibaataynta jinsiga ah. Magaaladu waa inay sidoo kale kordhisaa isgaarsiinta, taas oo si wanaagsan uga warramaysa dadka kala duwan ee magaalada ku nool isla markaana horumarinaysa caddaaladda dadka iyo sinnaanta jinsiyada. Isgaarsiintani waxay ka muuqan doontaa bannaanka magaalada, xarumaha Helsinki iyo kanaallada isgaarsiinta ee magaalada.



# Sidee loola soconayaa inay arrimuhu is beddalayaan?

Sida ku xusan qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee adeegyada Helsinki 2026–2029, haay'ad kasta oo magaalada ka tirsan waa inay sidaas darteed ka fikirtaa, sida ay hadda ula dhaqanto dadka kala duwan iyo waxa ay sida imika si ka wanaagsan u qaban karto.

Haay'adaha kala duwan waa inay qoraan, taas oo ah inay qoraal ku diiwaangeliyaan, isbeddellada ay ku samaynayaan hawlahooda iyo sida ay ugu guuleystaan inay horumariyaan caddaaladda dadka ee adeegyada Helsinki. Haay'aduhu waa inay sidoo kale arrimahan warbixin ka siiyaan guddiga fulinta ee Magaalada Helsinki. Inta lagu jiro sannadaha 2026–2029, guddiga fulinta ee Magaalada Helsinki wuxuu laba jeer ka hadli doonaa, waxa ay haay'aduhu qabteen iyo sida wanaagsan ee ay ugu guuleysteen. Guddiga fulinta ee Magaalada Helsinki wuxuu maamulaa dhaqaalaha, maamulka iyo hawlaha magaalada. Xafiiska maamulka magaalada Helsinki ayaa sidoo kale la socda, in qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee adeegyada magaaladu uu isbeddel keeno.

# Halkeed ka helaysaa xog dheeraad ah?

- Haddii aad rabto xog dheeraad ah oo ku saabsan adeegyada Magaalada Helsinki, booqo bogga Helsinki ee af Finnishka fudud ku qoran.
- Khariidadda shabkadda adeegyada Helsinki ee internetka.
- Qorshaha sinnaanta iyo caddaaladda ee Magaalada Helsinki 2026–2029 waxa uu internetka ku leeyahay nooc dheer oo ku qoran af Finnish faseex ah. Wax ka baro qorshaha.

# Sideen anigu saameyn u yeelan karaa?

- Bogagga Ka qayb qaado oo saameyn ku yeelo ee Magaalada Helsinki waxaa ku jira xog ku saabsan sida aad saameyn ugu yeelan karto horumarinta magaalada.
- Helsinki waxaa ka jira goleyaal iyo guddiyo wada-tashi oo badan oo aad la xiriiri karto, haddii aad rabto inaad wax weydiiso ama aad saameyn ku yeelato arrimaha. Waxaad tusaale ahaan indha-indhayn kartaa kuwan (bogaggani kuma qorna af Finnish faseex ah):
  - Guddiga dhallinyarta
  - Guddiga wada-tashiga sinnaanta iyo caddaaladda
  - Guddiga naafonimada
  - Guddiga waayeelka
  - Eeg dhammaan guddiyada iyo hay'adaha wada-tashiga ee Magaalada Helsinki

Helsinki